

LIGHT READING

customer newsletter

Maajo/Juunyo 2008

City Light waxay bixiyaan waxyaabo dhiirigeliya macaamiisha si looga caawiyo dhawrida khayraadka bey'adda:

- Waxaad u dirtaa in dib loo farsameeyo qaboojiyeyaashaagii hore waxaana lagu siinayaa \$30 midkiiba (xadku waa: two). Si aad ugu qalanto in lacag lagu soo celiyo, qaboojiyeyaasha waa in ay nadiif ahaadaan, oo ay shaqeynayaan oo uu cabbirkoodu u dhaxeeyo 10 illaa 30 cagood lix geesle ah. Shirkadda JACO Environmental, Inc. ayaa soo qaadayaan qaboojiyeyaashii hore. Si ballan lagaaga soo qaado aad uga sameysato waxaad ka wacdaa JACO Environmental, Inc. **1 (877) 577-0510** ama ballan ku sameyso cinwaanka internetka www.jacoinc.net. Waxaad xulataa badhanka ay ku qoran tahay "Rebate Pickup."
- Dhawrso korontada si ay u yaraato biilkaaga korontada adigoo isticmaalaya nalalka galuubyada nooca *fluorescent* halka aad ka isticmaali lahay galuubyada nooca *incandescent*. City Light waxay dukaaman badan ku leeyihiin qiimo dhimis loo yaqaan *Twist & Save*. Si aad u hesho liiska dukaamanka ay jirto qiimo dhimista, waxaad wacdaa **(206) 684-3800** ama waxaad ka eegtaa macluumaadka ku yaal bogga internetka ee www.seattle.gov/light/conserves/cv5_lw1.htm. Lama doonayo kuubonada ama foomamka lacag soo celinta.
- Waxaad ka iibsan kartaa mashiinka dharka dhaqa ee ku fiican isticmaalka korontada adigoo adeegsanaya barnaamijka **WashWise** ee aad ku dhawran karto korontada, biyaha iyo lacagta adigoo weliba helaya lacag soo celin gaaraysa \$100. Si aad macluumaad dheeraad ah u heshid, waxaad wacdaa **(206) 684-3800** ama eeg bogga internetka ee www.seattle.gov/light/conserves/resident/washwise/.



Waxaad nolol maalmeedkaaga ka qayb qaadataa in aad taageerto dhimista sunta kaarboonka ee hawada gasha. Si aad ra'yi uga hesho waxa la sameynaayo, waxaad wacdaa **(206) 684-3800**. Waxaad qiyaasi kartaa suntan kaarboonka aad isticmaasho xisaabiyaha ku yaal bogga internetka ee www.seattlecan.org.

Xusuusinta xilliga gu'ga: Waxaad nadiifisaa agagaarka meesha isticmaalka korontada laga eego

Shaqaalaha Seattle City Light ee cabbira korontada waxay u baahan yihiin in ay nadiif ahaato qiyaastii seddex cagood agagaarka saacadda korontada laga eego si ay u eegi karaan. Waxaad fadlan ka qaadaa geedaha, qalabka, alaabta dhismaha ee ka hor istaagi kara in ay eegaan. Macaamiisha leh eeyaha iyo albaabada xirma ee ka hor istaagaya shaqaalaha cabbira isticmaalka korontada waxaay wici karaan **(206) 386-1731** si ay u codsadaan in ay qorshe ballan ah ee lagu soo galo ay la sameystaan City Light.



LIGHT READING

customer newsletter

Miyaad guuraysaa? Su'aalaha iyo jawaabaha ku saabsan bixinta biilka

- **Yaa ka mas'uul ah in uu bixiyo biilka korontada?**

Dadka qaangaarka ah ee ku nool guriga ayaa si wadajir uga mas'uul ah bixinta biilka korontada xittaa haddii aysan magacyadooda ku qorneyn xisaabta. Shakhsiyaadka diida in mas'uuliyadda bixinta lacagta waa in ay soo caddeeyaan in ay meel kale ku noolaayeen muddada biilka. (SMC 21.49.100 d)



Miyaad guuraysaa? Su'aalaha iyo jawaabaha ku saabsan bixinta biilka (socota)

- **Miyeeey milkiileyaasha guriga mas'uul ka noqon karaan biilka degganaha?**

Haddii guriga laga guuro oo ay milkiilaha iyo degganaha la socodsiin waayaan City Light **10 maalmood gudahooda**, waxaa suuragal ah in biilka degganaha loo soo diro milkiilaha. Milkiileyaasha hantida iyo degganeyaasha si siman ayeey mas'uul uga yihiin in ay la soo socodsiiyaan City Light.

(SMC 21.49.100B,C, SMC 21.49.130B, DPP 500PIII-302)

- **Degganeyaasha cusub miyaa loo soo gudbin karaa biilka ay galeen dad hore u ahaa milkiile ama deggane?**

Haddii City Light aysan helin codsi qoraal ah ee ku saabsan biilka kama dambeysta ah wakiilka ammaanada iibka, iibiyaha, ama iibsadaha, waxaa suuragal ah in ay City Light lacagta ka soo ceshadaan iibsadaha, biil kasta ee aan hore loo bixin inta aan mas'uuliyadda la kala wareegsan. Shirkadaha ammaanada iibka waxaa laga doonayaa in ay u soo qoraan shirkadaha adeegga korontada biilasha ee taagan haddii aysan iibsadaha iyo iibiyaha aysan si rasmi ah uga tanaasulin. (RCW 60.80.020(4)(a), DPP 500PIII-302)

Si City Light loo soo ogeysiyo isbeddelka degganaanta iyo lahaanshada hantida, waxaad isticmaashaa arjiga internetka ee laga helo www.seattle.gov/light/accounts/resa/ ama wac (206) 684-3000 si lagu caawiyo.

Bogga internetka: Furitaanka Adeegga Korontada

Waxay shabakadda internetka kaa caawinaysaa haddii aad qorsheynayso mashruuc dhisme ah ee ku saabsan adeeg koronto ee cusub. Waxaad ka heli doontaa macluumaadka iyo khayraadka ku saabsan dhammaan noocyada adeegga korontada oo ay ku jiraan shuruudaha adeegga, tilmaamaha dhismaha, arjiyada, lambarrada lala xiriiriyo iyo khadadka la oggol yahay. Waxaad tagtaa www.seattle.gov/light/ kaddibna waxaad xulataa "Electric Service" oo ku hoos taal "Info & Help."



Seattle City Light, 700 Fifth Avenue, Suite 3200. PO Box 34023, Seattle WA 98124-4023

www.seattle.gov/light

Waxaad helaysaa foomkani oo noocyo kala duwan ah haddii aad codsatid. Waxaad wacdaa (206) 684-3000.

Tifaftiraha: Marilyn Mar

(206) 684-3794

Marilyn.mar@seattle.gov